Tilmaanbixiyaha guri deganaansho lagu guuleystay

A. Guri

1. Ijaarka waa in la bixiyaa waqtigiisa ugu danbeeyn maalinta ku qoran in la bixiyo.
2. Gudaha sigaar laguma cabikaro.
3. Waqtiga aamusnaanta habeenkii waa saacada 22 ilaa subaxdii saacada 6/7. waqiyada kalena deriska lama dhibikaro.
4. Qofka guriga degan isagaa masuul ka ah nadaafada guriga iyo hagaajintiisa. nadiifinta waa in la qadariyaa walxaha kala duwan ee dhismuhu ka sameysanyahay.
5. Wax dayactira kuma sameynkartid, waa inaad ogolaansho weeydiisataa kuwa guriga kaa ijaaray.
6. Godka musqusha (suuliga)/tuubooyinka biyaha qaada laguma shubi karo qashin.
7. Balankoonka waa lagu waran karaa dhar gudihiisa, maya dibadiisa.
8. Balankoonka derbigiisa dhinaca dibada wax lama suran karo ama saari karo.
9. Deriishadaha iyo albaabada waa in la xiraa marka guriga laga baxaayo.
10. Xeerarka kala danbeynta waxaa si gooni ah loogu muujiyey wax ku dubashada griiliga(qatarta dabka).
11. Go,yaasha iyo roogaga waxaa lagu jafi karaa balakoonka deyrka ku yaal ee guriga hawada looga furo ama birta roogaga ee dibada taal.
12. Wixii xumaada ama jaba waa in si degdeg ah loo ogeeysiiyaa kuwa guriga kaa ijaaray ama shirkada dayactirka.
13. Makiinada alaabta waxaa xiri kara qof xirfad u leh. Qofka guriga degen waxaa masuuliyad ka saarantahay soo gadashada caaga makiinada hoos looga dhigo.
14. Guriga kuma xiran kartid adiga makiinada raashinka mida qiiqa ka saarta.
15. Guriga qof kale kuma wareejin kartid.
    Weydii shirkada ama qofka kaa ijaaray hab dhaqanka sharciga ijaarka guryaha.
16. Dab ka digaha waa qasab. Qofka guriga waa inuu isaga soo gashto oo masuul iska saaraa.
17. Waxaa lagu talinaayaa inaad geshid ceymiska guriga.
18. Biyuhu waa lacag mar walba, biyaha kulul sedex goor wexeey ka qaalisan yihiin kuwa qaboow.

B. Meelaha lawada wadaago
Koridhoorada, wadiiqadaha dabaqa dhulka hoose, qolka dhar dhaqista, bakhaarada

1. Waa ineey nadiif ahaadaan.
2. Qofka guriga degen waa inuu qadariyaa qoraalada kala duwan ee habka isticmaalka qolka dharka, qolka qalajinta dharka iyo sawnada:
    - Qolka dharka waxaa waqtiga laga qabsadaa liiska waqti qabsiga kaas oo lagu qoraayo
        i. waqtiga dhardhaqistu bilaabaneeyso iyo waqtigeey dhamaaneeyso magaacaga iyo qolka numbarkiisa.
        ii. Rooga Laguma dhaqi karo qasaalada. Dhar biyo ka daadanayaan lama gelin karo
        iii. makiinada wax qalajisa.
        iv. Waqtiga sawnada waxaa laga qabsadaa shirkada dayactirka. Waqtiga sawnada lacag la,aanta ah ee la wado galo, ee ragana mar wada galaan dumarkana mar wada galaan, waxaa lagu soo qoraa derbiga warbixinada lagu soo dhejiyo.

3. Xirnaanshaha albaabada: waa inaad masuuliyad iska saartaa inuu albaabka koridhoorka uu xirmaa markaad ka baxdo.
4. Joogitaan aan micno ku jirin looma ogola koridhoorka iyo jaraanjarada. Buuqna looma ogola.
5. Laguma cabi karo sigaar/isticmaali karo maandooriye.
6. Xirashada saxanka sataleetka waa inaad ogolaansho weydiisataa shirkada maamusha guriga.
7. Jaraanjarada alaab lama dhigan karo. Alaabta waa in la geeyaa meelaha loogu talagalay tusaalee, dadka degan baaskiiladooda bakhaarka baaskiilada la geeyaa.
8. Bakhaarka qolkaaga u gaarka ah wuxuu ku yaalaa badanaa dabaqa hoose, waa adiga inaa quful ku xirataa. Ha ku xareeysan alaab qiima leh bakhaarka.
9. Qolka naadiga/shirarka waxaa maamula gudiga guriga, meesha lagala xiriiraayo wexeey ku dhegentatahay derbiga warbixinada lagu dhejiyo.

C. Guriga dibadiisa

1. Qashinka waa in bac lagu xiraa oo lagu rido meeshiisa(qashin walba ku rid sanduuqa loogu talagalay). Qashin loogama tegi karo sanduuqa qashinka dibadiisa. Fiiri qoraalka habka kala saarista qashinka. Loogama tegi karo meesha qashinka alaabta guryaha ama alabo kale oo waaweyn.
2. Guriga dibadiisa waa ineey nadiif ahaataa, ma haleynkartid tusaale. Ubax ku beeris.
3. Miraha ka baxa dibada meelaha la wadaago waxaa loo guran kara sida lagu heshiiyo.
4. Carruurta waa in lala socdaa dibada wexeey ka qabanaayaan.
5. Gurigaaga dibadiisa waa inaad nadiifisaa oo eey hagaagsanaataa.
6. Baabuurta waa in baarkinka ku jiraan. Baarkinada korontada leh gooni ayaa loo dalbadaa.
7. Baarkinada martida waxaa loogu talagalay waqtiga booqashada oo keliya.
8. Baabuurta laguma dhaqi karo lagumana sameysan karo banaanka ama baarkinka baabuurta.

D. Waxyaabaha kale

1. Xayawaank guri joogta waa inuu xirnaadaa guriga dibadiisa iyo saxardoodana waan in la nadiifiyaa.
2. Xayawaanka guri joogta lama geyn karo meesha carruurta ku ciyaarto.
    a. Xayawaanada ma dhibi karaan dadka kale ee guriga degen.
3. Waa inaad ku dadaasho heshiiska deriska- isku wanaagsanaada deriska.
4. Qofka guriga degan isagaa masuul ka ah martidiisa.
5. Qof walbaa wuxuu masuul iska saaraaya deganaan ku noolashada guriga iyo nadaafada meelaha, wax walba oo keenaaya deganaansho raaxo leh.
6. Xeerka kala danbeynta waa in lagu dhaqmaa.
7. Xeerka kala danbeynta waxaa go,aamiya shirkada ama qofka guriga kaa ijaaray. wexeey quseeysaa dadka guriga degen oo dhan.
8. Qof walba oo guriga degen waa inuu ku dhaqmaa sharciga ijaarka guryaha.

Yaan la xiriiri karaa, hadaan su,aalo qabo ama dhib arko?

- Qofka guriga degan ee masuulka ka ah dhismaha
- Caawiyaha dadka guriga degen, hadaad heshay meesha lagala xiriiraayo

Käännetty Pirkanmaan tulkkikeskuksessa 8/2016